IIB MAGALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 1da Sebt. 1988 L. 9

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya
FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER-SHARCI L. 7 ee 17 Agoosto 1988, Wax ka beddelid Sharci lam. 6 ee 28.12.1971, kuna saabsan Canshuurta macaashka daaraha. Bog; 650

XEER-SHARCI L. 8 ee 15 Agoosto 1988, Wax ka beddelid Sharci lam. 2 ee 7.1.1984, kuna saabsan Canshuurta gadista. » 651

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 45 ee 9 Agoosto 1988, Dhismo Guddi Baaris Heer Qaran. » 652

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 46 ee 9 Agoosto 1988, Magacaabid Xubnaha Guddiga Baarista ee Heer Qaran. » 653

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 1 Luuliyo 1988, Dalacsiin G/le Dhexe iyo ku Magacaabid Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka. » 655

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 8 Agoosto 1988, Magacaabid Wasiir. » 657

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48/bis 1da Sebt. 1981, Hab Maamulka iyo Qaybinta Dhulka G/Banaadir. » 659

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 19 1da Agoosto 1988, Aqoonsi Urur Samafalka Beryasamo. » 660

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.5.88 Lumid Jeeg War. L. 0768203 ku qoran Cismaan Sh. Daa'uud L. 425 » 661

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.8.88, Lumid 2 J/W. ku qoran Saciid Cali Nuur L.425/bis » 671

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Suleymaan C/qaadir L. 426 » 672

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0623000 ku qoran Axmed Saciid Jaamac L. 427 » 673

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.8.88, Lumid Buug Kayd L. 6162 ku qoran Sokoray Wardheere Aadan L. 428 » 674

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Mire Aadan L. 429 » 675

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Jaamac Maxamed Warsame L. 430 » 676

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.8.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Axmed Nuur Abuukar L. 431 » 677

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.8.88, Lumid 9 Jeeg War. ku qoran Nuur Axmed Xalane L. 432 » 678

MAXKAMADDA G. MUDUG 25.8.88, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Maryan Daahir Hoori L. 433 » 679

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.8.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi CaliGeedi L.434 » 680

MAXKAMADDA G. MUDUG 29.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0189584 ku qoran Shuuriye Cadow Colow L. 435 » 681

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0665685 ku qoran Maxamed Xaaji Nuur L. 436 » 682

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Faadumo Sh. Axmed L. 437 » 683

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.8.88. Lumid Jeeg War L. 0071169 ku qoran Cabdullaahi Xasan Sadiiq L. 438 » 684

MAXKAMADDA G. J/HOOSE 25.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0744719 ku qoran Ibraahim Haajir Sheekh L. 439 » 685

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0199404 ku qoran Aamina Ibraahim Xasan L. 440 » 686

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

Xeer Sharci lambar 7, taariikh 15 Agoosto 1988: Wax ka beddelid Sharci lambar 6 ee 28.12.1971, kuna saabsan can_shuurta macaashka daaraha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 6 ee 28.12.1971;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida degdegga ah ee loo qabo wax ka beddelidda Canshuurta macaashka daara_raha;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaarad_da Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer_Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Boqoleyda canshuurta macaashka daaraha ee ku xusan Qodobka 1aad ee Sharciga lambar 6 ee 28.12.1971, waxaa loo beddelay sida soo socota:

I) Dakhliga sannadka ee daaraha marka hore waxaa laga jarayaa 20%, sida uu jideynayo Qodobka 23aad ee Sharci lambar 5 ee 5.11.1966.

II) Haraaga waxaa loo canshuurayaa:

| | |
|---|---|
| — Ilaa Shs. 120.000: | 22,5%; |
| — Min Shs. 120.001 ilaa Shs. 240.000: | 25 %; |
| — Wixii ka badan Shs. 240.001: | 30 %; |

Qod. 2aad

Xeer_sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu sa_xiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faa_finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda isagoo loo gudbinayo Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 15 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer-sharci lambar 8, taariikh 15 Agoosto 1988: Wax ka beddelid sharci lambar 2 ee 7.1.1984, kuna saabsan canshuurta gadista.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 2 ee 7.1.1984;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida degdegga ah ee loo qabo dib u habeynta canshuurta gadista;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 1aad ee Sharci lambar 2 ee 7.1.1984 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« Canshuurta gadista waxay ku waajibeysaa badeecooyinka iyo adeegyada hoos ku tilmaaman:

B) BADEECADAHA:

1. Soo dejinta;
2. Ganacsiga jumlada;
3. Badeecadaha ay soo saaraan Warshadaha Dalka.

T) ADEEGYADA:

1. Qaansheegtada hoteellada;
2. Adeegga Wakiillada Maraakiibta (Shipping Agence);
3. Iidhehda iyo ogeysiisyada;
4. Tikidhada isboortiga, shineemada iyo riwaayadaha;
5. Qaansheegtada dhardhaqyada qalalan (dry cleaning),

dhaqidda baabuurta; kirada cajaladaha, makhaayadaha cuntada iyo cabidda ee darajada koowaad, sawirada iyo qoraalka gacanta (arts) iyo timo qurxinta haweenka (parucchiere) iyo timo jaridda ragga (barbieri).

Qod. 2aad

Tacriifada canshuurtu waxay noqoneysaa sida soo socota:

b) Badeecooyinka 10%;
t) Adeegga 5%

Qod. 3aad

1. Canshuurta ku waajibtay riwaayadaha iyo shineemoo yinka waa in lacag ahaan loogu soo gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta, waxaana masuul ka ah uruurinta iyo soo gudbinta canshuurtaas Maamulayaasha goobaha lagu dhigay Shineemada ama Riwaayadda.

2. Sidoo kale canshuurta ku waajibtay isboortiga, iidheh da iyo ogeysiisyada iyo adeegyada Wakiillada maraakiibta waxaa soo gudbinaya Wasaaradda Isboortiga, Wasaaradda Warfaafinta iyo Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.

Qod. 4aad

Habraaca uruurinta iyo ciqaabaadka la xiriira canshuurtan waxaa loo raacayaa axkaanta sharci lambar 2 ee 7.1.84.

Qod. 5aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda isagoo loo gudbinayo Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 15 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 45 ee 9 Agoosto 1988, Dhismo Guddi Baaris Heer Qaran.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 49 ee 23 Disembar 1984;

MARKUU ARKAY: Dhibaatooyinkii foosha xumaa ay u geysteen Gobolada Waqooyi ee Dalka J.D.S. Burcaddii dhawaan dibadda ka soo weerartay;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in baaris iyo talo ka bixin lagu sameeyo heerka uu la egyahay dhibaatooyinka iyo khasaarada soo gaartay Gobolladaas loona magacaabo Guddi Heer Qaran ah oo isugu jira Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda;

ISAGOO GUDANAYO: Xilkiisa ku tilmaaman qodobka 4aad Sharciga Dastuuriga ah ee Lambarkiisu yahay 49, soona baxay 23 Disembar 1984.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la dhisay Guddi baaris iyo talo bixin Heer Qaran ah oo ka kooban Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda.

2. Xubnaha Guddiga waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne oo gaar ah.

Qod. 2aad

WAAJIBAADKA GUDDIGA

1. Waa in uu si dhab ah u baaro weerarkii burcadda ku soo qaaday Degmooyin ka mid ah Gobolada Waqooyi fikradda iyo ulajeedada ka dambeysay, khasaarooyinka ay u geysteen Dadweynaha Goboladaas degeen iyo heerka ay la egyihiin.

2. Waa in uu soo jeediyo talooyin ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa xag dhaqaale, bulsho, nabadgelyo iyo siyaasadba.

Qod. 3aad

1. Guddiga wuxuu awood u leeyahay inuu baaro, qof

kasta oo uu xilgudashadiisa uga maarmi waayo. Wuxuu kaloo isla ujeedadaas darteed u tagi karaa meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya.

2. Qof kasta oo is hortaagaa ama carqaladeeya ama ka geysanwaayaa taageero isagoo la weydiistay xilgudashadaan Guddigu wuxuu ka qaadi karaa tallaabo asluubeed, haddii uusan keenin dambi ka weyn.

Qod. 4aad

Guddigu wuxuu natiijada baaristiisa iyo talo bixintaba u soo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya sida ugu dhakhsaha badan.

Qod. 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa faaifnta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 46 ee 9 Agoosto 1988, Magacaabid Xubnaha Guddiga Baarista ee Heer Qaran.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yanay 49 ee 23 Disembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 45 taariikh 9.8.88 ee lagu abuuray Guddiga Baarista ee Heer Qaran;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaallayaasha soo socda waxaa loo magacaabay Xubnaha Guddiga Baarista ee Heer Qaran:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | J.le | Maxamed Buraale Ismaaciil | Guddoomiye |
| 2. | » | Abuukar Xasan Wehelliye | Guddoomiye ku-xigeen |
| 3. | » | Maxamed Maxamuud Warsame | » » |
| 4. | » | Maxamed Nuur Galaal | Xubin |
| 5. | » | Maxamed Xasan Barre | » |
| 6. | ) | Cabdullaahi Maxamuud Xirsi «Ashcari) | » |
| 7. | » | Cabduraxmaan Jaamac Maxamed | » |
| 8. | » | Shire Suudi Maxamuud | » |
| 9. | » | Maxamed Xarakoow Maxamed | » |
| 10. | » | Maxamed Dhaqane Dhoore | » |
| 11. | » | Cali Maxamed (Ilkacase) | » |
| 12. | » | S/Guuto Cali Ismaaciil Maxamed | » |
| 13. | » | Yuusuf Tallan Cali | » |

Qod. 2aad

Guddigu wuxuu yeelan karaa ilaa labo guddi hoosaad oo ka kooban xubnihiisa oo ay kala hoggaaminayaan labada Guddoomiye ku xigeen. Dhismaha guddi hoosaadyada waa in uu noqdaa 7 iyo 5 si loo ilaaliyo nidaamka codka hal dheeriga ah.

Guddi hoosaadyada waxaa lagu dari karaa, haddii loo

baahdo, xubno aan ka mid ahayn guddigaan rasmiga ah oo loo xushay xirfad gaar ah.

Xubnahaas cod bixin kama qayb gelayaan.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 1da Luulyo 1988 U dalacsiin G/le Dhexe iyo Ku Magacaabid Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar ee Jaalle Cabdi Maxamed Fiidow.

MADAXWaaYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lagu dhisay Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar;

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo arrinta ay ku saabsantahay soo-jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Waxaa la gartey in G/le Cabdi Maxamed Fiidow loo dalacsiiyo G/le Dhexe isla markaana lagu magacaabo Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar.

Qod. 2aad

Waxaa la gartey in G/le Dhexe Xaashi Daahir Cabdulle lagu wareejiyo Maamulka D/Hoose ee Muqdisho asagoo ka qaban doono jago Agaasime.

Qod. 3aad

Waxay Labada Jaalle ee ku kala xusan qod. 1aad iyo 2aad xaq u leeyihiin Gunno xil iyo mid guri ee jagooyinka loo kala magacaabay sharciguna u oggolyahay.

Qod. 4aad

Mushaarooyinkooda iyo Gunnooyinkooda waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda D/Hoose ee Muqdisho.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 4 bogga lamb. 63
Muqdisho, 21 Luulyo 1988
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 1da Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA J D S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 8ad Agoosto 1988. Magacaabid Wasiir.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, faqradda 1aad, xarafka (s) ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyey, kuna saabsan Nidaamka Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta loo magacaabo Wasiir, kaddib markii ay jagadaasi bannaanaatay;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. MAXAMUUD SACIID MAXAMED waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Qod. 2aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8.8.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48/bis ee 1da Sebt. 1981. Hab Maamulka iyo Qaybinta Dhulka G/Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 111aad ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. 46 ee 16.9.1979 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay golayaasha shacbiga degaanada Maamulka gobollada iyo degmooyinka Lam. 6 ee 12.2.80;

ISAGOO ARKAY: Qod. 1aad ee sharciga Lambar 10 ee 17.12.80ka;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Joogtada ah ee golaha shacbiga Magaalada Xamar kuna taariikhaysan 11.7.81;

ISAGOO TIXGELIYEY: Duruufta ka taagan hab Maamulka dhulka gobolka Banaadir.

WUXUU SOO SAARAY AMARKAN:

Qod. 1aad

HABKA QAYBINTA DHULKA

Si qaybinta dhulka dhismo u noqoto mid ku salaysan qodobada sharciga Maamulka dhulka G/Banaadir oo lambarkiisu yahay 10 soona baxay 17.12.80 waxaa dhul bixinta gobolka Banaadir laga hab raaci doonaa amarkan.

Qod. 2aad

Caddaalad ku salaynta qaybinta dhulka.

Iyadoo la ilaalinayo Nidaamka ku sheegan Qodobada 3,4,5,6,7, iyo 8 oo sharciga Maamulka dhulka lana qaddarinayo himilada ah «in qof walba uu helo Buqcad uu ku dhisto Hoygiisa», dhul-bixintu waxay ku salaysanaanaysaa caddaalad iyo sinnaan, waxaana horumarinta leh qofka la hubiyey in ay jirto baahi dhab ah, araajidiisana soo hor mariyey.

Qod. 3aad

WAAJIBAADKA WEYDIISTAHA
BIXINTA DHULKA LEH ISTICMAALKA RASMIGA AH

Qofka soo weydiisanaya dhul leh isticmaal rasmi ah,

waa in uu waaxda Maamulka dhulka Dowladda Hoose u soo ..'aa Codsi ku qoran Warqadda Lixda shillin (6), wuxuu.. .. soo raacinayaa Masawirkiisa, kaasoo lagu dhejinayo ..ab loogu tala galay.

Qod. 4aad

CADDEYSIIN IYO BUUXIN QAAB

1. Weydiistaha markii laga qabto arjiga uu soo qortay, lana diiwaan geliyo, waxaa loo celinayaa Nuqulka arjigiisa, waana in lagu dul qoraa caddeyn ah in laga qabtay nuqulkii asalka ahaa. isla markaa waxaa weydiistaha laga buuxinayaa qaabka (A).

2. Qaabka (A). oo xubinta hore lagu soo sheegay wuxuu ku saabsan yahay sugitaanka qofka iyo baahida uu u qabo dhulka uu soo weydiistay.

Qod. 5aad

XOGWARSI DEGMO

Waaxda iyo Maamulka dhulka, kaddi bmarkii loo soo gudbiyo arjiga weydiistaha qaabka «A», waxay xog-warran weydiisanaysaa Degmada uu qofku deggan yahay.

Degmada waxaa laga doonayaa in ay soo hubiso baahida dhabta ah oo weydiistaha, kaddibna waxay soo buuxineysaa qaabka «B» waxayna u direysaa Waaxda Maamulka dhulka Dowladda Hoose ee Muqdisho.

Qod. 6aad

OGGOLAASHO IYO DIIDMO CODSI

1. Weydiistaha aan codsigiisa la aqbalin, kaddib markii la soo mariyo habka ay dhigayaan Qodobada hore lagu soo sheegay, waa in muddo bil-dhexdeed ah la siiyo Jawaab qoraal ah, iyadoo la ogeysiinayo sabaha keenay aqbalid la'aanta arjigiisa.

2. Weydiistaha codsigiisa la aqbalo, waa in Agaasimaha Waaxda Maamulka dhulka uu arjiga dushiisa ku qoraa Lambarka dhulka la siinayo, waxaana markaas warqadaha weydiistaha loo gudbinayaa Xubinta Maamulka, taasoo si rasmi ah ugu fureysa Galka dhul bixinta.

Qod. 7aad

HUBAALIN

1. Xubinta Maamulka, waxay galka dhul-bixinta u gudbineysaa xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga, taasoo booska qofka la siinayo hubaalin farsamo kaddib u sameyneysa afar nuqul oo ah naqshad dhuleed (Planimentria).

2. Hubsashada farsamo, waa in ay noqotaa mid tilmaan cad ka bixinaysa qaabka dhulka Cabirkiisa, inta uu ku fadhiyo iyo soohdintiisa, waana in uu saxiixaa Farsamayaqaan uu u xilsaaray Madaxa Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga.

NAADINTA

Qod. 8aad

Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga, waxay galka oo ay ku jiraan afar nuqul oo naqshad dhuleed ah iyo hubsashada farsamo, dib ugu celineysaa Madaxa xubinta Maamulka.

Xubinta Maamulka, waxay weydiistaha ka qabaneysaa qiimaha Sameynta Naqshad dhuleedka iyo lacagta naadada dhulka ee kuwada xusan Qod. 25aad isla Amarkan.

Qod. 9aad

SAMEYNTA NAQSHAD DHISMO

1. Kaddib markii ay dhamaato muddada naadada ku xusan, qod. 22aad ee Sharciga maamulka dhulka, lana ogaado in aysan jirin cid ka qabta wax dooda ah, waxaa weydiistaha la siinayaa laba nuqul oo ah naqshad dhuleedka si uu u soo sameysto naqshadda dhismaha dhulka.

Qod. 10aad

BAARID NAQSHAD DHISMO

1. Weydiistaha marka uu soo sameysto naqshadda dhismaha dhulka, wuxuu xubinta maamulka u soo gudbinayaa 3 nuqul oo ah naqshadda dhismaha, wuxuuna soo raacinayaa warbixinta farsamo iyo Codsiga oggolaansho naqshadda dhismaha.

2. Naqshaddu, waa inay tahay mid u hoggaansan Amarka dhismaha magaalada Muqdisho.

3. Weydiistaha qiimaha Baaridda Naqshadda dhisma, .. ku sheegan wuxuu bixinayaa qodobka 25aad ee Amar-kaan.

Qod. 11aad

GUDDIGA OGGOLAASHADA NAQSHADDA

Xubinta Guddiga Oggolaashada naqshadda, xilkoo-da, awooddooda iyo hab raacooda shaqo waxaa tilmaamaya Qod. 18aad ilaa Qod. 20aad ee Amarkan dhismaha Magaala-da Muqdisho.

Qod. 12aad

XOGHAYNTA GUDDIGA

Xubinta Maamulka, waxay galka weydiistaha oo ay ku jirto naqshaddii dhismuhu u gudbineysaa Xoghaynta Gud-diga Oggolaanshada Naqshadda dhismaha, taasoo hor kee-neysa guddiga si uu u qabsado howsha uga abbaaran.

Qod. 13aad

OGGOLAASHO NAQSHAD DHISMO

1. Guddigu, kaddib markii uu baaro naqshadda, isla markaasna xaqiiqsado in ay u dhan yihiin shuruudaha lar-kaano ee ku sheegan Amarkaan dhismaha Magaalada Muq-disho, wuxuu oggolaanayaa Naqshadda dhismo.

2. Naqshadda la oggolaaday, waxaa loo kala qaybina-yaa sida hoos ku qoran:-

B. 1 Nuqul waxaa la siinayaa weydiistaha, iyadoo la raacina-yo Qaabka Caddeynta oggolaashada naqshadda.

T. 2 Nuqul, waxaa lagu reebayaa galka dhul-bixinta ee wey-diistaha.

Qod. 14aad

DIIDMO NAQSHAD DHISMO

Naqshadda la Oggolaan waayo, waxay xoghayntu saxid awgeed dib ugu celineysaa weydiistaha, iyadoo isla markaas-na qoraal loogu sheegayo cilladaha lagu oggolaan waayay, waxaana weydiistaha u furan in uu marar kale soo weydiisto

oggolaasho, isagoo hadba ka soo baxaya cilladahii hore loogu celiyay.

Weydiistaha markasta oo lagu noqdo naqshaddiisa, waxaa laga qaadayaa kala bar lacagtii looga qaaday oggolaashada naqshadda.

Qod 15aad

LACAG QABASHO

Kaddib oggolaashada, naqshadda, xubinta maamulka waxay weydiistaha ka qaadeysaa qiimaha dhulka oo hadba ku cad xeer Madaxweyne, dhulka aan lahayn isticmaalka rasmiga qiimahiisa waxaa xaddidaya Xeer uu soo saaray Wasiirka Maaliyadda, isagoo dhageystay Duqa Magaalada Muqdisho.

Dakhliga ka soo gala Dowladda Hoose dhul-bixinta, Wasaaradda Maaliyaddu waxay ku leedahay 20%.

Lacagtaas iyada ah, waxaa Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Hoose u gudbineysaa 3dii Biloodba mar, seddexda bilood ee u dambeysa sannadka maaliyadda qaybteeda waxaa la wareejinayaa ugu dambeynta 20ka Disembar.

Qod. 16aad

SAXIIXYADA

Xubinta Maamulka, waxay galka weydiistaha u gudbineysaa Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga oo weydiistaha guddoonsiineysa, dhulka, waxayna isla mar ahaantaas diyaarineysaa 3 nuqul oo ah Warqadda siismada dhulka, waxaana wada saxiixaya farsamayaqaankii guddoonsiiyay, qofka la guddoonsiiyay iyo madaxa waaxda maamulka dhulka.

Qod. 17aad

FASAX DHISMO DHULKA LEH ISTICMAALKA RASMIGA

1. Haddii aan dhismaha lagu billaabin laguna dhameystirin Muddo laba sano gudahood ah, waxaa loo qaadanayaa fasax dhismo oo cusub.

2. Nuucyada iyo howlaha la xiriira dhismaha ee Fasax-qaadashadu, waxaa laga hab raacayaa Amarkan dhismaha

Magaalada Muqdisho.

Qod. 18aad

WARQADDA DEGSIIMADA

Markii dhismuhu dhamaado, lana hubiyo in dhismuhu yahay mid waafaqsan naqshaddii hore loo oggolaaday, waxaa qofku qaadanayaa warqadda ku isticmaalidda guriga (Certificato di Abitabilità o Servibilità).

Ugu dambeystii, waxaa qofka guriga dhistay la siinayaa Dekreetada Lahaanshada sharciyeed ee Guriga (Decreto di Libera Disponibilità), oo uu soo saxiixay Duqa Magaalada Muqdisho, laguna soo saarayo Faafinta rasmiga ah ee J.D.S.

Qod. 19aad

DHISMAHA SHARDISAN

Habka ku sheegan qodobada 16, 17, 18 ee isla Amarkan waa nidaamka la raacayo markuu dhismuhu yahay mid gaar ahaaneed.

Dhismooyinka Hay'adaha Dowladda loogama baahana Fasax qaadasho, mar haddii la guddoonsiiyo dhulka ay soo weydiisteen lagana oggolaado naqshadda dhismaha ay soo sameysteen.

Haddii dhulka la siiyo Hay'ad ku shaqo leh Nabadgelyada qaranka kuma qasbana in ay keento naqshad dhismeed, hase yeeshee waa in ay u hoggaansanaato jaangooyada guud iyo habka bilicsamida magaalada.

Qod. 20aad

BIXINTA DHUL LEH ISTICMAAL KUMEEL GAAR AH

Weydiistaha soo codsado dhul leh isticmaal ku meel gaar ah, waxaa la marinayaa habka ay dhigayaan qodobada 2, 3, 4, 5, 6, 7 ee Amarkan, kuwaasoo uu kala mid yahay qofka soo weydiistay dhul leh isticmaal rasmi ah.

Qod. 21aad

LACAG QABASHADA

Xubinta Maamulka, waxay weydiistaha ka qaadeysaa lacagta qiimaha dhulka (Diritto di Sopralougo), keddibna waa la guddoonsiinayaa dhulka, waxaana loo sameynayaa

siismada dhulka warqaddeeda, iyadoo guddoonsiiyuhu Xaqiijinayo in dhulkaas uu bannaan yahay.

Qod. 22aad

SAXIIXYADA

Warqadda siismada dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah waxaa saxiixaya Duqa Magaalada Muqdisho ama qof uu wakiisho iyo Agaasimaha Waaxda Maamulka dhulka, wa-xayna ka kooban tahay 2 nuqul oo midkood la siinayo weydiistaha, midna wuxuu ku harayaa Baloogga xubinta maamulka, hal koobina waxaa loo gudbinayaa Taliska Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho.

Qod. 23aad

DHISMAHA

Dhulka leh isticmaalka ku meel gaarka ah oo lagu bi-xiyay habka la soo sheegay, waxb laga dhisi karaa Nuucyada dhismo ee ku tilmaaman Xubnaha 3 iyo 4, ee Qod. 5aad ee Sharciga Maamulka dhulka ee Gobolka Banaadir.

Qod. 24aad

Bixinta Fasaxyada Dhulka leh isticmaalka Rasmiga

Haddii qofka dhulka la siiyey uusan dhismaha ku Bil-laabin kuna dhameyn Muddo Hal sano budaheed ah, waxaa khasab ku noqoneysa in uu qaato Fasax dhismo cusub, iyadoo la dhowrayo qod. 14aad ee Sharciga Maamulka dhulka, isago fulinayo Shuruudaha hoos ku qoran:-

B. In uu keeno Codsi dhismo oo ku qoran Warqadda (6) shillin ah.

T. In la soo hubaaliyo Dhulka in uu yahay mid waafaqsan Shuruudaha u degsan dhulka leh isticmaalka ku meel-gaarka ah.

J. In uu ku xiro Arjigiisa warqadda canshuurta ee sanad-kasta ku waajibtay iyo warqad mulkiyeedka uu u haysto dhulka.

X. In uu bixiyo Xuquuqda lacageed ee la xiriirta adeegga oo uu sharcigu ku waajibiyay.

Qod. 25aad

QIIMAHA ADEEGYADA DHULKA

Qiimaha Adeegyada LABADA dhulba, waxaa xaddiyada Duqa Magaalada, isagoo dhagaystay Guddiga Joogtada Golaha Shacbiga Degaanka Xamar.

Adeegyada waxaa ka mid ah Samaynta naqshad dhuleedka, naadada dhulka, Baarista naqshadda dhismaha iyo Di bu baariddeeda, Fasaxyada dhismaha, Cusboonaysiinta, Warqadda Degsiimada guriga, IWM.

Wixii la xiriira qiimaha adeegyada ee aan lagu sheegin Amarkan, waxaa Go'aan ka gaaraya Duqa Magaalada Muqdisho.

Qod. 26aad

Kicinta ama Duminta Dhismaha Sharci Darrada ah

Marka la kicinayo Xaafad hore u degganayd si sharci darro ah, waxaa loo magacaabayaa guddi farsamo oo u xil saaran hubaalinta Xaaladaha ku sheegan Qod. 16aad ee sharciga Maamulka dhulka ee Gobolka Banaadir iyo Go'aan ka gaaridda wixii la xiriira arrimaha nidaaminta Xaafadda oo ayan habayn sharciga iyo Amarkaan.

Qofka laga dumiyo guri waxaa toos loo guddoonsiinayaa dhulkii uu degayay, kaddibna waxaa laga qaadayaa qiimaha dhulka, iyadoo la marinayo shuruudaha ku xusan Qod. 2, 3, 4, ee Amarkaan.

Qod. 27aad

KA XIL LA'AAN

Dawladda Hoose ee Xamar, xil kama saara wixii dhibaata ah ee ka yimaada haddii qofka dhulka la siiyay uusan wax ka dhisan muddada sharcigu sheegay wakhtiga ku qoran warqadda dhul.bixinta.

Qod. 28aad

GUDDIGA DACWOOYINKA DHULKA

Xubnaha Guddiga dacwooyinka Dhulka Gobolka Banaadir ee u xil saaran Xallinta Mashaakillada dhulka, wuxuu ka koobnaanayaa:-

1. Ku-xigaha Duqa Magaalada Muqdisho Qaybta Arrimaha Bulshada — Guddoomiye
2. Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka — Xoghaye

3. Agaasimaha Waaxda Xiriirka Dadweynaha — Xubin
4. Qareen ka tirsan Garyaqaanka Guud — »
5. Taliyaha Qaybta Booliska G/Banaadir — »

Guddiga Dacwooyinka waxay u yeeran karaan Aqoonyahanno ama farsamayaqaanno kala soo taliya arrimaha laysku haysto ama u smeeya baaris aqooneed.

Go'aanka guddigu waa Idaari, waxaana racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Awoodda u leh, iyadoo la raacayo habka oogista dacwooyinka Madaniga ah.

Fadhiga Guddigu, wuxuu ansaxi karaa markii ay ka soo wada qayb galaan dhammaan xubnaha, waxaana laga sameynayaa war qor.

Haddii guddoomiyaha Guddigu ay ku timaado sabab uu u gudan waayo Xilkiisa, waxaa Guddiga Madax ka noqonaya Xubin ka tirsan Guddiga Joogtada ee uu soo magacaabo Duqa Magaalada Muqdisho.

Qod. 29aad

KALA GADASHO DHUL

Waxaa reeban, kala Iibsashoda dhul bannaan.

Waxaa la kala Iibsan karaa oo qura, dhulkii dhisan oo ay waaxda maamulka dhulkuna caddeysay in uu dhisan yahay.

Qod. 30aad

OGGOLAASHADA KALA GADASHADA

Waaxda Maamulka Dhulka, waxay bixineysaa warqad caddeyn ah oo uu saxiixay Qof farsama yaqaan ah oo loo xil saaray. Howshaas; waxaa warqaddaas la bixin karaa marka uu farsamayaqaanku hubsado dhismaha dhulka, cashuuraha iyo haqshad dhuleedka in uu waafaqsan yahay qormaha Xaafadda, wuxuuna buuxinayaa qaabka «T», oo ku Lifaaqan Amarkan.

Qod. 31aad

DHAMAYSTIR

Wixii aan lagu sheegin Amarkaan, dhulna saameeya waxaa Go'aan ka gaaraya Duqa Magaalada Muqdisho, isa-

goo dhowraya Sharciyada u degsan waxyaabaha ay arrin_taasu khuseyso.

Qod. 32aad

BARAATIKADA SOCOTA

Dhulka leh isticmaalka ku_meel gaarka ah ee Baraati_kadiisu socoto, waa in lagu dhameystiro muddo 15 Maal_mood kaddib ah laga billaabo maalinta uu Amarkan soo Baxo.

Qod. 33aad

BAABA'

Waxaa la baabi'iyay Amar kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin qodobada Amarkaan.

Qod. 34aad

DHAQAN GELID

Amarkani, wuxuu dhaqan gelayaa Maalinta uu Duqa Magaalada Muqdisho Saxiixo.

DUQA MAGAALADA MUQDISHO

(J.le Dr. Cabdullaahi Salaad Warsame)

Xoghayaha Guddiga Joogtada ah ee G/Shacbiga D/Xamar
(J.le Dr. Cabdullaahi Maxamed Siyaad)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 8aad sharciga golayaasha Shac_biga ee degaannada (sharci lambar 6 ee 12.2.80) wuxuu an_saxiyey guddoonka Golaha Shacbiga Magaalada Xamar oo lagu soo saaray amarka Duqa Magaalada ee kor ku tilmaa_man.

Muqdisho, 2da Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 19 ee 1.8.1988,

Aqoonsi Urur Samafalka Beryosamo.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Qod. 3aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Beryasamo oo ah Urur samafal, ujeeddadiisuna tahay Daryeelka Caafimaadka dadka Soomaaliyeed oo Naafada ah.

Qod. 2aad

Ururka wuxuu Saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
### QAYBTA MADANIGA
### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Shariif Xabiib;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0768203 ee laga sameeyey Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca J.le Cusmaan Sheekh Daa'uud sida ku cad warqadda lam. 5010 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis.Guud kuna jirto Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0768203 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/weyn kuna jirto lacag ahan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cusmaan Sh. Daa'uud.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cali Shariif Xabiib lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Cali Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0183779_1260577 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna kala jirto Sh.So. 600.000 iyo Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xaaji Cali sida ku cad warqadda lam. 9292 ee Ban_giga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0183779_1260577 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa_liyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 600.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xaaji Cali.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Saciid Cali Nuur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 600.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi_

L. 425/bis

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Suleemaan C/qaadir;

HADDUU TIXGELIYEY: in ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0733171-0733172 kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Suleemaan C/qaadir sida ku cad warqadda lam. 6693 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0733171-0733172 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Suleemaan C/qaadir.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Suleemaan Cabdulqaadir lacagta cadadeedu tanay Sh.So. 90.000 oo ah bedelkii Jeegagga wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi-

L. 426

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Saciid Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0632000 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50 000 kuna qoran magaca J.le Axmed Cali Cismaan sida ku cad warqadda lam. 9230 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9 1968

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0632000 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Cali Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso J.le Axmed Saciid Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan ... 'shortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaa...

L. 427

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Sokorey Wardheere Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 6162 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.378.23 kuna qoran magaca J.le Sokorey Wardheere Aadan sida ku cad waraadda lam. 0057 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 6162 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.378.23 kuna qoran magaca J.le Sokorey Wardheere Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso J.le Sokorey Wardheere Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 40 378 23 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 16 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 428

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Mire Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna kala qoran magacyada J.le Maxamed Mire Aadan iyo J.le Axmed Cosoble Guuleed sida ku cad warqadda lam. 9040 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0187302 | 500.000 | Maxamed Mire Aadan | W/dhiigley |
| 1217990 | 100.000 | » » » | » |
| 0173197 | 400.000 | Axmed Cosoble Guuleed | 2aad |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna kala qoran magacyada J.le Maxamed Mire Aadan iyo J.le Axmed Cosoble Guuleed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad in ay siiyaan J.le Maxamed Mire Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareeg... muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 429

678/PIS

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Jaamac Maxamed Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 241.000 kuna qoran magaca J.le Jaamac Maxamed Warsame sida ku cad warqadda lam. 19433 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo;

| J.W.Lr. | Sh So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1039965 | 100 000 | Jaamac | Maqamed | Warsame | C/gaabo |
| 1039966 | 100 000 | » | » | » | » |
| 0669169 | 41 000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUUeeXEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 241.000 kuna qoran magaca J.le Jaamac Maxamed Warsame.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo in ay siiso J.le Jaamac Maxamed Warsame lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 241.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 430

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

KADDIB AKHRIY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Nuur Abdukar;

KADDIB MAGEEIYEY: in ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0009259-0004900 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera kuna kala jiro lacag dhan Sh.So. 150,000 iyo Sh.So. 110.000 kuna kala qoran magacyada J.le Xasan Cimin Colow iyo J.le Xalimia Maxamed Caraale sida ku cad warqadda lam. 9599 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

KADDIB ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0009259-0004900 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera kuna jiro guud ahaan lacag dhan Sh.So. 260,000 kuna kala qoran magacyada J.le Xasan Cimin Colow iyo J.le Xalimia Maxamed Caraale.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera in ay siiyaan J.le Axmed Nuur Abdu kar lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 260.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii in ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 431

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Nuur Axmed Xalane;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 9 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku tilmaaman kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.700.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 9442 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0181857 | 500.000 | Cumar Maxamed Geedi | Xarunta |
| 0181858 | 500.000 | » » » | » |
| 1179909 | 100.000 | » » » | » |
| 1179310 | 100.000 | » » » | » |
| 1204433 | 100.000 | Nuur Axmed Xalane | 1/Xamar |
| 1204434 | 100.000 | » » » | » |
| 1173267 | 100.000 | Ibraahin Cali Faarax | W/dhiigley |
| 1217710 | 100.000 | Axmed Maxamuud Aadan | » |
| 1217881 | 100.000 | Mire Cali Cadoow | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUUeeXEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.700.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Nuur Axmed Xalane lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.700.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarawn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

## MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug, ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud oo Wakiil u ah Warasadii Marxuumad:- Maryan Daahir Hoori, uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegag Wareega oo ku qorraa Magaca Marxuumadda kor ku xusan oo lumay;

MARKUU ARKAY: Warqadda L. 114 ee 9.8.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, ayna ku soo caddeeyeen Jiritaanka iyo lumista Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan kuna qorraa Magaca Maryan Daahir Hoori;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

### WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegaggii hore ee lumay oo ah kuwa la soo sheegi doono, looguna beddelo Jeegag cusub J.le Maryan Daahir Hoori oo u dhigma kuwii hore;-

J/W.Lr. 1141127 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. 23.6.88
J/W.Lr. 1141128 ay ku qorn tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 1141124 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 1141126 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 0534329 ay ku qoran tahay Sh.So. 50.000 Tr. »

Ka dib markii Go'aanka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah, haddii aan muddadaas laga keenin wax is hor taag ah, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta loo geliyaa Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud oo Wakiil u ah Warasadii Maryan Daahir Hoori oo Jeegagga hore lahayd.

Gaalkacyo, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 433

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi li Geedi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha W/dhiigley iyo Gaalkacyo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 136.800 kuna kala qoran magacyada J.le Cabdi Cilmi Barqadle iyo J.le Maxamuud Maxamed Geedi sida ku cad warqadda lam. 9440 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1152601 | 100.000 | Cabdi Cilmi Barqadle | W/dhiigley |
| 0032883 | 36.800 | Maxamuud Maxamed Geedi | G/kacyo |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 136.800.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman in ay siiyaan J.le Cabdi Cali Geedi lacag-ta qiimaheedu tahay Sh.So. 136.800 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka la-gu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 434

## MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug, ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga Taariikhdiisu tahay 28.8.1988 oo uu soo qortay Jaalle Xasan Siciid Xasan uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeeg Wareega oo uu yahay Lambarkiisu 0189584 Taariikh 16.8.198 oo laga sameeyey Ban-[illegible] Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta [illegible] ee Xamar, kuna qoran magaca Shuuriye Cadow Colow, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (Shanboqolkun);

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 28.8.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, oo lagu caddeeyey in Jeeggaasi jiray Sharci ahaanna ugu soo Wareegay Xasan Siciid Xasan, uuna ka lumay lagana sameeyey Baafin Guud;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

### WUXUU AMRAYAA

In Jeegga kor ku tilmaaman la baabi'iyo looguna beddelo J.le Xasan Siciid Xasan Jeeg cusub oo u dhigma kii ka lumay ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah haddii aan muddadaas wax is hortaag ah laga keenin muddadaas, waana in Jeegga cusub gacanta laga geliyo Xasan Siciid Xasan amase cid wakaalad Sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 435

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xaaji Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0665685 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Xaaji Nuur sida ku cad warqadda lam. 9294 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0665685 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Xaaji Iuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo in ay siiso J.le Maxame dXaaji Nuur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 436

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Faadumo Sh. Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 117.500 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sh. Axmed sida ku cad warqadda lam. 7971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

| J.W Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0688990 | 50 000 | Faadumo Sh. Axmed | Xarunta |
| 0688989 | 50.000 | » » » | » |
| 0071270 | 17.500 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 117 500 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sh. Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Faadumo Sh. Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh So 117 500 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 14.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 437

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Xasan Sadiiq;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0071269 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 17.500 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq sida ku cad warqadda lam. 7971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0071269 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 17.500 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 17.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 438

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Lr. Ord./595/88

GUDDOOMIYAHA MAX. G. J/HOOSE

HADDUU ARKAY: Codsiga Taariikhdiisu tahay 24.8.88 ee uu soo qortay J.le Ibraahim Haajir Sheekh oo Soomaali ah degen Kismaayo kuna saabsan lumidda Jeegga Wareega ee lam. 0744719 ee ay ku qoran tahay lacag dhan 100.000 Sh.So. ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afmadoow Taariikh 3.8.88 kuna qoran magaciisa;

HADDUU ARKAY: Ogaysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afmadoow ee lam. 197 ee ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee lam. 0744719 ee ay ku qoran tahay lacag dhan 100.000 Sh.So. lagana sameeyey Laantaasi;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 DL. 9.9.65 N. 2.

WAXAA LA AMRAYAA

In dib loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee Lambarkiisu sare ku xusan yahay kadib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda. Jeegga Wareega ee la samayn doono waa in lagu qoraa magaca J.le Ibraahim Haajir Sheekh gacantana laga saaraa isaga ama cid ka sidata Wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo mudda 30 casho ah ee aanu kor ku soo sheegnay.

Kismaayo, 25.8.1988

GUDD. MAX. G. J/HOOSE
(Dr. Maxamuud Axmed Faarax)

L. 439

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aamina Ibraahim Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0199404 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Ibraahim Xasan sida ku cad warqadda lam. 9639 ka soo baxday Xis-Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0199404 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Ibraahim Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Aamina Ibraahim Xasan lacagta cadad-deedu tahay Sh.So. 400.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31 8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 440